Nyköping

Degmada Nyköping waxaa jooga Tiimka gurmadka ee Asaasaqa. Waxaan u shaqeyneynaa sidii hage, annagoo bixineyna talo iyo taageero, haddii uu jiro cudurka asaasaqu.

Waxaan u joognaa adigaaga qaba cudurka asaasaqa iyo adigaaga qaraabada la ah qof qaba asaasaq awgiin.

Tiimka gurmadka ee Asaasaqu wuxuu ka koobanyahay shaqaale aqoon gaar ah u leh cudurka asaasaqa. Shaqaalaheenna tiimka ka tirsan waxaa na saaran waajib sir qarin, adeegyaduna waa lacag la'aan.

## Maxay Tiimka asaasaqu kuu sameyn karaan?

- In ay ku siiyaan talo iyo macluumaad
- In ay kugu casuumaan wadahadal taageero iyo/ama kugu soo booqdaan guriga
- In ay kugu casuumaan kulan-kooxeedyo

## In waqti hore lagu dadaalo waxay wanaajisaa tayada nolosha ee qofka

Waxaan ognahay in, in taageero laguu billaabo waqti hore, ay qiimo weyn kuu leedahay adigaaga dhawaan ogaaday inaad qabto asaasaq iyo adigaaga xigtada ah.

Waxaan idinka caawineynaa inaad la xiriirtaan gacan-hayayaasha kaalmada ee degmada marka aad u baahataan inaad codsataan mid ka mid ah dadaallada kala duwan ee degmada.

## Muxuu yahay cudurka asaasaqu?

Asaasaqu waa magac wadareed kulmiya tiro cudurro ah iyo dhaawacyo haleeli kara shaqada maskaxda.

Asaasaqu maaha qeyb ka mid ah gabowga caadiga ah, laakiin wuxuu ku badanyahay dadka da'da ah.
Waxaad wax dheeri ah ka akhrisan kartaa: www.demenscentrum.se

## Tiimka gurmadka ee Asaasaqa - Waxaan u joognaa adiga dartaa!

E-mail: resursteametdemens@nykoping.se